

Difaaca dadku wuxuu 11 jenaweri tijaabinayaa dawannada digniinta diyaaradaha ee Norway

Laba jeer sannadkii, Jenaweri iyo Juun, wuxuu difaaca dadku tijaabiyaa qalabka digniinta (dawanka diyaaradaha), si loo hubiyo iney shaqenayaan iyo si loo hagaajiyo kuwa kharaabey. Arbacada 11 jenaweri saacada 12.00, waxey tijaabin doonaan digniinta «farriin muhiim ah – raadso macluumaad», ee dhammaan degmooyinka leh qalabka digniinta.

Digniinta

Digniinta waxa la dirayaa saddex taxane oo ay hal daqiiqo u dhaxeeyso taxanayaasha. Macnaha digniintu waa inaad ka raadsato macluumaad, tusaale ahaan, raadiyaha, telefishinka, wargeysyada, mareegaha dawlada iyo baraha bulshada.

Dawannada digniinta diyaaradaha

Dalka Norway waxa ku yaalla 1250 oo dawannada diyaaradaha ah, kuwaas oo dadka uga digaya dhacdo khatar degdeg ah. Qalabka digniinta waxey inta badan ku yaalaan magaalooyinka iyo meelaha dadku ku badan yihiin, waxaana digniinta maqli kara qiyaastii dadka kalabadh. Qalabka digniinta waxaa la isticmaali karaa wakhtiga nabadda iyo dagaalka labadab.a